



Gobolka Minnesota - Deeqda Kabista COVID ee Dadweynaha Caadiga ah

Fadlan guji "Create a Profile to Get Started (Warbixinta Shakhsiga ah si Aad Codsiga)" u bilowdo. Markaad rabto guji "Edit (Beddel)" si aad wax uga beddesho Warbixintaada.

Codsiga ma buuxin kartid adiga oo aan ka jawaabin Warbixintaada.

Warbixin

Buuxi

Beddel

Si aad u bilowdo codsi cusub, guji "+Get Started (Codsiga Bilow)" oo aad hoos u arki doonto. Markaad ku soo noqoto Boggan, waxaad shaashadda dhinaca hoose ku arki doontaa xaaladda dirista codsigaaga oo ah midabbo kala duwan.

- Haddii aad hoos ku aragto midab ah **BULUUG**, codsigii aad dirsatay waa laga shaqeynayaa oo ma jirto wax adiga lagaa rabo.
- Haddii aad hoos ku aragto midab ah **CAGAARAN**, adiga ayaa wax lagaa rabaa. Guji Meesha Dirista si aad u dhammeystirto.
- Haddii aad ku aragto midab ah **GUDUUD**, waxaa jira khalad. Fadlan **Administrator (Maamulaha)** barnaamijka kala soo xiriir.

Tilmaamaha Gelidda/Is-diiwaangelinta

Barnaamijka lagu galo internetka ee Chrome ayaa ugu fiican kadinka gelidda. Fadlan isticmaal kambuuutar aad ku geli karto kadinka iyo foomamka codsiga. Kadinka internetka kuma shaqeynayo internetka taleefanka.

Dadka Hadda Cusub:

Marka aad gujiso Sign Up (Is-diiwaangelinta), waxaa lagu weydiin doonaa in aad qorto cinwaankaaga boostada internetka (email) iyo in aad sameysato fure aad ku soo gasho. Markaad sameysato furaha, waxaa lagu sameynayaa hab iyo kadin aad ku soo gasho boggan si aad ugu dhex sameyso waxa lagaa rabo.

Dadka Aan Cusbeyn:

Gal kadinkaaga intarnetka adigoo istimaalaya cinwaanka boostada intarnetka (email) iyo furaha aad sameysatay markii aad kadinka isku diiwaan gelineysay. Haddii aad illowday furehaaga, guji "Forgot your password (Furahayga ma xusuusto)?" oo dabadeedna raac habka aad ku sameysan karto fure cusub.

Fadlan kala xiriir Adminstrator (Maamulaha) barnaamijka wixii su'aalo ah oo aad qabto.

CALAAMADi SANTUUQA ka dib markaad akhrisato Ogeysiiska Digniinta Xogta iyo Qirashada Isticmaalidda Xogta si loogu xaqiijiyo oggolaanshaha iyo fahmidda macluumaadkaaga.

Ogeysiiska Digniinta Xogta: Iyadoo loo Cuskanayo Xeer-hoosaadyada qeybta, farqadda 13.04, farqadda 2, waxaan kaa codsaneynaa xog lagu go'aaminayo haddii aad xaq u leedahay kabis dhaqaale Minnesota Department of Employment and Economic Development (Waxda Horumarinta Shaqada iyo Dhaqaale ama DEED). Khasab kuguma aha in aad keento macluumaadka lagaa codsaday, laakiim haddii lagaa waayo ma suurtoobi karto in la go'aamiyo sida aad xaq ugu yeelan karto kaalmada dhaqaalaha. Xogta lagaa helo ee arrimahaaga shakhsiga ah ama xogta aan dadweynaha la tusi karin waxaa lala wadaagi karaa hay'ado dowladeed oo sharci u haysta eegista xogaha dadweynaha, sida Xafiisyada Xisaabaadka Maaliyadda ee Maamulka, Gobolka, ama haddii kale sida ay oggolaansho uga helaan sharciyada amarka maxkamadeed ama kan federaalka. Waxa kale oo lala wadaagayaa Ururrada Samafalka Minnesota iyo hay'adaha aan macaash-doonka ahay ee ku jira liiska la soo xaqiijiyey ee ay DEED ku go'aamiso in xaq loo yeelan karo deeqaha meheradaha la soo codsan karo ee ah kabista dhaqaale ee COVID-19 ee dadka caadiga ah.

Qirashada Isticmaalidda Xogta: Macluumaadka maaliyadda inta khuseysa meheradda ee aad ku soo gudbiso codsiga lacagta deeqda ah waa in ay noqdaan qarsoodi ama wax aysan dadweynuhu heli karin Minn. Stat. § 13.591, farq. 1 ayaa sidaas dhigeysa, sida warbixinta sumcadda dhaqaale ee shakhsiyeed; waraaqaha xisaabxirka maaliyadda; qiimaha guud ee meheradda; qorsheyaasha meheradda; qiyaasta dakhliga iyo kharashka; xisaabxirka ugu dambeeya; liiska macaamiisha; canshuur-celiska dakhliga; iyo naqshadda, suuqa, daraasadaha yool-baarka ah ee aan lagu bixin lacago dowladeed. Haddii aad kaalmo ka hesho DEED, macluumaadka lagaa hayo ee aan hoos ku qoran dadweynaha ayaa arki kara sida uu dhigayo sharciga Minn. Stat. § 13.591, farq. 2 qorsheyaasha meheradda; qiyaasta dakhliga iyo kharashka ee aan kaalmada khuseyn; liiska macaamiisha; canshuur-celiska dakhliga; iyo naqshadda, suuqa, daraasadaha yool-baarka ah ee aan lagu bixin lacago dowladeed. Xogta dadka ee aan kaaga helno codsigaaga kaalmada dhaqaale waxaa laga dhigi karaa mid qarssodi ah sida uu dhigayo sharciga Minn. Stat. § 116J.401, farq. 3 iyo Minn. Stat. § 13.02, farq. 12.

Markaad buuxiso oo aad soo dirsato codsigan waxaad noo xaqiijineysaa:

Application as of 9/14/21

- 1. Waxaan akhristay oo aan fahmay macluamadka kor ku qoran oo waxaan raalli ka ahay in aan DEED u gudbiyo macluumaadka la iska rabo.**
- 2. Waxaan fahamsanahay in macluumaadka loo adeegsan karo sida kor ku qoran oo waafaqsan Xeerka Isticmaalidda Xogta Shakhsiga ee Minnesota.**
- 3. Waxaan si dhab ah u sheegayaa in aan meheradda u ahay shaqaale ama wakiil sharci ah oo codsiga ku soo diraya magaca meheradda.**